DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA

BISHA OCTOBER 2025

DEC 2025

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha Oktober 2025

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

HORDHAC 1

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025 2

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA OCT 2025 & 2024 3

DAKHLIGA CANSHUURAHA 6

DAKHLIYADA KALE 8

DEEQAHA DIBADDA 8

DHABTA KHARASHAADKA JAN-OCT IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025..... 10

DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN-OCT, HAY'ADAHA DAWLADDA.....15

KHARASHAADKA JOOGTADA AH 15

KHARASHAADKA MASHAARIICDA 16

Lifaaqa 1aad: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Oct 17

Lifaaqa 2aad: Faah-faahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan-Oct, 2025 35

Lifaaqa 3aad: Soo koobid Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Ee Hay'adaha Jan-Oct, 2025 56

Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1aad: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Oct 2025 & 2024 4
Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Oct 2025 & 2024 4
Jaantuska 3aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Oct 2025 5
Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-Oct 2025 & 2024 7
Jaantuska 5aad: Deeqaha Dibadda Jan-Oct 2025 & 2024 9
Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah, Bilaha Jan- Oct - 2025 & 2024 11
Jaantuska 8aad: Kharashaadka Mashaaciicda ah, Bilaha Jan-Oct - 2025 & 2024 12

Liiska Shaxaha

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - Oct 2025 2
Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga Oct 2025 & 2024 3
Shaxda 3aad: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Oct ee sannadaha 2025 & 2024 6
Shaxda 4aad: Deeqaha Dibadda Jan-Oct 2025 iyo 2024 8
Shaxda 5aad: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Oct 2025, ... 10
Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha October 2025 iyo 2024 13
Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- Oct 2025 & 2024 14
Shaxda 8aad: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda 15

HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dakhliga dhabta ah ee lasoo uruuriyey iyo kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay miisaaniyad sannadeedka 2025 oo ay ansixiyeen labada aqal ee baarlamaanka.

Kutalagalka hore ee miisaaniyadda waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah ee ay labada aqalka ee baarlamaanka ansixiyeen oo aan waxba laga badalin, kutalgalka danbe waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah oo loo kala wareejiyey miisaaniyadda hay'adaha qaar ama madaxyada miisaaniyadda ee hay'adaha dhexdooda.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2025 ayaa ah **$430M** wuxuuna ka yahay **32%** wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay **$902M** oo **68%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2025.

Wadarta miisaaniyadda asalka ah ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **$628M** waxayna ka tahay **46%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka miisaaniyadda asalka ah kharashaadka mashaariicda ay tahay **$731M** waxayna ka tahay **54%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa Oct 2025 ayaa ahayd **$322M** wuxuuna ka badan yahay **6%** iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025 ayaa ahayd **$252M** waxayna ka hoosaysaa **34%** iskubiirinta deeqaha dibadda la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025 ayaa ahayd **$652M** waxayna aad ugu dhawdahay wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2024.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doontaa saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dakhliga dhabta iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban yahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey billaha Janaayo ilaa October 2025, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida loogu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan ee isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2025. Lifaaqa 3^{aad} soo koobid fulinta mashaariicda.

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

Wadarta dakhaliga ee miisaaniyadda asalka ayaa ah **$1,331,969,583** oo la filaayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2025 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ahayd **$430,341,430** oo **32%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay **$901,628154** oo **68%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2025.

Faah-Faahin	Bisha Oct 2025	Dhabta Jan-Oct 2025	Kutalagalka Hore	% Fulinta
Wadart Guud	**$59,310,359**	**$597,961,040**	**$1,331,969,583**	**45%**
Wadarta Dakhliga Dawladda	**$49,310,359**	**$573,829,125**	**$1,331,969,583**	**43%**
Dakhliga Gudaha	**35,859,849**	**321,776,156**	**430,341,430**	**75%**
Dakhliga Canshuuraha	26,659,160	230,499,827	295,289,259	**78%**
Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka	3,908,041	38,217,153	38,031,213	100%
Canshuurta Adeegga & Agabka	7,566,619	56,759,582	56,111,497	101%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	14,507,659	128,521,383	186,211,437	69%
Canshuuraha Kale	676,841	7,001,708	14,935,112	47%
Dakhliyada Kale	9,200,689	91,276,329	135,052,170	**68%**
DEEQAHA DIBADDA	**13,450,510**	**252,052,969**	**901,628,154**	**28%**
Deeqaha laba dhinaclaha	1,567,059	16,737,997	42,000,000	40%
Deeqaha Dhinacyada badan	11,883,451	235,314,972	859,628,154	**27%**
libka Hantida & Daymaha	**10,000,000**	**24,131,915**	**-**	**0%**
libka Hantida	-	3,631,915	-	0%
Daymaha Gudaha	10,000,000	20,500,000	-	0%

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - Oct 2025

Shaxda 1aad waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa October iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Wadarta dakhliga la helay bisha Oct ayaa ah **$49M**, Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday **$36M** una dhiganta **73%** wadarta dakhliga la helay bisha october, Deeqaha dibadda ayaa la helay **$13.5M** oo u dhiganta **27%** wadarta dakhliga la helay bisha October 2025.

Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa October ayaa ahayd **$574M** oo **43%** ka ah wadarta dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha ayaa lasoo uruuriyey **$322M** oo u dhiganta **75%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Deeqaha Dibadda ayaa la helay **$252M** oo **28%** ka ah miisaaniyad sannadeedka 2025 ee wadarta deeqaha dibadda.

Wadarta dakhliga libka Hantida ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ayaa ah **$3.6M**, waxaana laga soo wareejiyey xisaabaad bangi oo dibadda ugu furnaa dawladda wixii ka horeeyey 1991dii. Daymaha Gudaha oo ah **$21M,** ayaa horumaris/dayn ay Wasaaradda Maaliyadda kasoo qaadatay Bangiga Dhexe, si loogu bixiyo kharashaad hortabinta u leh Dawladda.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa October dakhli dhan **$38M** oo u dhiganta **100%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey **$57M** oo ah **101%** miisaaniyadda sannadka, waxaa la dhaafay saadaalintii sannadka, waxaana la soo urururiyey canshuur ka badan saadaalinta sannadka 2025. Sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo uruuriyey **$128.5M** oo u dhiganta **69%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

Dakhliyada kale waxaa la soo uruuriyey bilaha Jan-Oct 2025 dakhli dhan $91M oo u dhiganta 68% miisaaniyad sanadeedka 2025.

Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa October dakhli dhan **$17M** oo **40%** ka ah miisaaniyadda sannadka 2025, Deeqaha dhinacyada badan waxaana la helay **$235M** oo u dhiganta **27%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA OCT 2025 & 2024

Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2aad waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga Dawladdu heshay bisha Oct ee sannadaha 2025 iyo 2024.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Oct 2025	Dhabta Dakhliga Oct 2024	Koror/Naaqus
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda	**$49,310,359**	**$52,992,538**	**-7%**
Dakhliga Gudaha	**35,859,849**	**36,616,310**	**-2%**
Dakhliga Canshuuraha	**26,659,160**	**27,406,575**	**-3%**
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	3,908,041	3,857,049	1%
Canshuurta Adeegga & Agabka	7,566,619	6,325,131	20%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	14,507,659	16,528,835	-12%
Canshuuraha Kale	676,841	695,560	-3%
Dakhliyada Kale	**9,200,689**	**9,209,735**	**0%**
Dakhliga Hantida	18,400	184,043	-90%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	9,073,483	8,952,421	1%
Ganaaxa, Ciqaabta	108,807	73,271	48%
DEEQAHA DIBADDA	**13,450,510**	**16,376,228**	**-18%**
Deeqaha laba dhinaclaha	1,567,059	923,486	70%
Deeqaha Dhinacyada badan	11,883,451	15,452,742	-23%

Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga Oct 2025 & 2024

Sida ka muuqato shaxda 2aad dakhliga Dawladda ee la helay bish October 2025 ayaa ahaa $**49M**, wuxuuna ka yar yahay **7%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha October 2024. Dakhliga gudaha ayaa la helay **$36M** oo **2%** ka yar yahay dakhliga gudaha ee la helay bisha Oct 2024, halka deeqaha dibadda ay hoos u dhaceen **18%** marka la barbardhigo deeqda Dawladdu heshay bisha October 2024.

Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Oct 2025 ayaa **2%** ka yar dakhliga Gudaha ee la helay bisha October 2024. deeqaha dibadda ayaa hoos u dhacay **18%** bisha Oct 2025 marka la barbardhigo deeqaha dibadda ee la helay bisha Oct 2024. Dakhliga ugu badan ee hoos u dhacay ayaa ah Deeqaha dibadda laga helo wuxuuna ka yar yahay **18%** bisha Oct 2025 marka la barbardhigo Deeqaha dibadda la helay bisha Oct 2024.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bisha October 2025 dakhli dhan **$7.5M** wuxuuna ka badan yahay **20%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha October 2024. Kororka ugu badan ee canshuurtaan ayaa timid canshuurta khidmadda saxiixa oo la helay **$2M** oo aan soo xaroon bisha Oct ee sannadka 2024. Sidoo kale waxaa kordhay Canshuurta - Isticmaalka Waddo Marista (Tremistrale) ee la helay bisha Oct 2025 dakhli dan $1M, waxayna korortay **75%** marka loo fiiriyo Canshuurta - Isticmaalka Waddo Marista (Tremistrale) ee la helay bisha Oct 2024.



Jaantuska 1aad: Dhabta Dakhliga Dawladda – Bisha Oct 2025 & 2024

Sida ka muuqata Jaantuska 1aad Dakhliga Gudaha ee la helay bisha October 2025 ayaa ah **$36M** wuxuuna ka yar tahay **$756K** dakhliga gudaha ee la helay bisha October 2024. Deeqaha dibada ee la helay bisha Oct 2025 ayaa ah **$13.5M** waxayna ka yar tahay **$3M** deeqaha dibadda ee la helay bisha October 2024.

Deeqaha dibadda ayaa laga kala helay, Imaaraadka Carabta oo laga helay deeq dhan $**1.6M**, Bangiga Adduunka oo laga helay lacag ka badan **8.2M** iyo Bangiga Horumarinta Afrika oo laga healy $**1M.** Hay'adda Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada $**2.5M**

DAKHLIGA GUDAHA

Odoroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ahayd **$430M**, waxaana la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025 dakhli dhan **$322M** oo u dhiganta **75%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2025 ayaa **6%** ka badan iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2024.



Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dakhliga Gudaha – bilaha Jan-Oct 2025 & 2024

Sida ka muuqata jaantusta 2aad, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadaha 2025 iyo 2024.

Sida ka muuqaa jaantuska 2aad, dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay Bisha October ee sannadka 2025, wuxuu ka hooseeya 2% dakhliga gudah ee la helay bisha Oct 2024.

Bilaha July, Augusto iyo Sabtember ee sannadka 2025 ayaa dakliga gudaha kordhay waxaana la helay Jul $35M, Aug $35M iyo Sep $36M oo ka badan 19%, 15% iyo 36% wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha July, August iyo September 2024.

Saddex biloodlaha labaad ee sannadka 2025, dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay bilaha May iyo Jun 2025, wuxuuna hoos u dhacay bisha Jun 14%, bisha May 8% marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee la helay isla bilahaas sannadka 2024. Bisha April kaliya ayuu kordhay dakliga gudaha waxaa la helay 14% ka badan dakhliga gudaha ee la helay bisha April 2024.

Saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2025, dakhliga gudaha ayaa ka muuqda koror aad u yar marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan, Feb iyo Mar 2024. Bisha Maarso ayuu kordha 4%, bisha Febraayo ayuu kordhay 3%, halk bisha Janaayo uu kordhay wax yar 1%, marka la barbardhigo dakhliga gudaha ee lahaly bilaa Maarso, Febraayo iyo Janaayo 2024.

Dakhliga gudaha ayaa laga kala helay dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale.



Jaantuska 3aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Oct 2025

Sida ka muuqato jaantuska 3^{aad}, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2025, wuxuu **72%** kasoo xarooday dakhliga canshuuraha, halka **28%** kasoo xarooday dakliyada kale.

Dakhliga canshuuraha ayaa ka soo xarooday canshuuraha kala duwan ay dawladda qaado, waxaan ugu badan canshuurta kasoo xarooto dekada iyo garoonka diyaaraaha.

DAKHLIGA CANSHUURAHA

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeegga, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-Oct 2025	Dhabta Dakhliga Jan-Oct 2024	Koror/Naaqus
Dakhliga Gudaha	**321,776,156**	**304,264,613**	**6%**
Canshuuraha	**230,499,827**	**218,427,597**	**6%**
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	38,217,153	30,482,271	25%
Canshuurta Agabka & Adeegga	56,759,582	41,346,111	37%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	128,521,383	138,832,304	-7%
Canshuuraha Kale	7,001,708	7,766,911	-10%
Dakhliyada Kale	**91,276,329**	**85,837,016**	**6%**
Dakhliga Hantida	1,464,717	645,161	127%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	87,419,985	84,865,439	3%
Ganaaxa, Ciqaabta	935,916	326,416	187%
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	1,455,710	-	0%

Shaxda 3aad: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Oct ee sannadaha 2025 & 2024

CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay **17%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-Oct ee sannadka 2025. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo Canshuurta Faa'iidada shirkadaha.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa korortay **25%** bilaha Jan-Oct sannadka 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$38M**, halka bilaha Janaayo ilaa Oct ee sannadka 2024 la helay **$30M** oo ka hooseeyo canshuurta la helay sannadka 2025.

Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025 koror dhan **$5M** una dhiganta **64%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **$1M** una dhiganta **13%** wadarta kororka la helay ee Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Mushaarka shaqaalaha ayaa la helay koror dhan **$1.7M** oo u dhiganta **23%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025.

CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGGA

Waxaa la helay bilaha Jan-Oct dakhli dhan **$57M** oo ka badan **37%** iskubiirinta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024. Waxayna ka tahay **25%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaana ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.

Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo suuqyada ayaa laga helay bilaha Janaayo ilaa October 2025 dakhli dhan **$48.5M** oo u dhiganta **85%** wadarta Canshuurta

Agabka iyo Adeega. Canshuuraha Wado-marista iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **$8M** oo u dhiganta **15%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bilaha Jan-Oct 2025.

CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdisho. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo xarooda gudaha dalka. Dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2025 ayaa hoos u dhacay **7%** marka la barbardhigo wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2024.

Bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2025 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **$129M** oo u dhiganta **56%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, waxayna lasoo xareeyey **69%** wadarta odoroska miisaaniyad sannadeedka Dakhliga Gudaha ee 2025.

CANSHUURAHA KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah **$15M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan-Oct 2025 dhakhli dhan **$7M** oo u dhiganta **47%** wadarta Dakhliga Canshuuraha kale ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga la helay bilaha Jan-Oct 2025 waxay ka tahay **3%** wadarta dakliga canshuuraha. Waxayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaarahadaha.

Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2025 ayaa **10%** hoos u dhacday marka la barbardhigo canshuuraha kale la helay bilaha Jan ilaa Oct ee sannadka 2024.



Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-Oct 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 4aad oo soo bandhigaayo isbarbardhig qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Oct ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wuxuuna kaloo muujinayaa kororka iyo naaquska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigayo dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadaha 2025 iyo 2024. Waxaa hoos u dhac ka muuqda Canshuuraha kale iyo Canshuuraha Ganacsiga Dibadda.

DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, adeegyada dekadda iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaana ka soo xarooday bilaha Janaayo ilaa October 2025 dakhli dhan **$91M** oo ka badan **6%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Jan ilaa Oct 2025, waxaa **$35M** oo u dhiganta **39%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarooday adeegyada maamul Dawladda ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **$14M** oo u dhiganta **16%** wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada soomaaliya waxaa laga helay **$17M** oo u dhiganta **18%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **$4.5M** oo u dhiganta **5%** wadarta dakhliyada kale.

Sidoo kale dakhliga laga helay Dakhliga Hantida ee la helay bilaha Janaayo ilaa October ee sannadka 2025 ayaa ka badan **127%** dakhligii hantida ee la helay bilaha Jan ilaa Oct ee sannadka 2024. Sida ka muuqato shaxda 3^{aad}, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **187%** bilaha Jan ilaa Oct 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$936K** halka bilaha Jan ilaa Oct ee sannadka 2024 la helay dakhli dhan **$326K**. Khidmadaha iyo sheegashooyinka waxaa ka soo xarooday bilaha Jan-Oct 2025 dakhli dhan $**1.5M**, waa lacag ka soo xarootay caymiska abaahara ay horay dawladda u bixisay, hay'adda SODMA ayaa codsatay in dib loogu soo celiyo si waafaqsan heshiiska ay wada galeen shirkadda caysmiska iyo hay'adda.

DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha Dibadda oo ka ah **68%** wadarta dakhliga miisaaniyadda Dawladda, waxaa la helay **$252M** oo u dhiganta **28%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025 ayaa hoos u dhacay **34%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Oct 2024. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **$235M** kana yar **34%** deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024. Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay **$17M** oo ka yar **40%** wadarta deeqaha laba dhinacalaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024.

Faah-Faahin	Dhabta Dakhliga Jan-Oct 2025	Dhabta Dakhliga Jan-Oct 2024	Koror/Naaqus
DEEQAHA DIBADDA	**252,052,969**	**384,287,780**	**-34%**
Deeqaha laba dhinaclaha	**16,737,997**	**27,853,356**	**-40%**
Bangiga Adduunka	7,500,000	15,000,000	-50%
Bangiga Harumarinta Afrika	9,237,997	12,853,356	-28%
Midowga Yurub	**235,314,972**	**356,434,425**	**-34%**
Bangiga Adduunka	205,663,702	335,001,230	-39%
Bangiga Harumarinta Afrika	9,679,652	5,021,368	93%
Midowga Yurub	12,347,970	9,917,970	25%
Wadamada Dhoofiya Shidaalka (OPEC)	-	3,030,000	
Qaramada Midoobay	1,963,558	-	0%
Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE)	5,660,091	3,463,856	63%

Shaxda 4^{aad}: Deeqaha Dibadda Jan-Oct 2025 iyo 2024

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudahiisa.

Deeqaha labo dhinaclaha ah waxaa la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025 deeq dhan **$17M** oo **34%** ka hoosaysa deeqaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2024. Dawladda Turkiga ayaa laga helay **$7.5M** oo u dhiganta **45%**, halka Imaaraadka Carabta laga helay **$9M** oo u dhiganta **55%** wadarta deeqaaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025.

Sida ka muuqato shaxda 4aad Deeqaha dhinacyadda badan ee la helay bilaha Jan ilaa October 2025 Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay **$206M** oo u dhiganta **87%,** Bangiga Harumarinta Afrika ayaa Dawladda ugu deeqday **$10M** una dhiganta **4%,** Midowga Yurub ayaa ayaa laga Helay Deeq dhan **12M** oo u dhiganto **5%,** Qaramada Midoobay ayaa laga helay deeq dhan **2M** una dhiganto **1%,** Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE) aya Dawladda ugu deeqday **6M** una dhiganto **2%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa October 2025.

Sida ka muuqato jaantuska 5aad waxaa deeqaha dibadda ay kordheen bilaha, Sep, July, Mar, Feb iyo Jan ee sannadk 2025, waxaana la helay deeq ka badan tan la helay bilaha la midka ah ee sannadka 2024. Bilaha Jan-Mar ayuu sameeyey kororkii ugu badan marka loo fiiriyo kororo boqolay ahaan.

Bilaha Oct, Aug, Jun, May, iyo Apr ee sannadka 2025 waxaa la helay deeq ka hosaysa deeqada la helay isla bilahaas ee sannadka 2024. Boqolay ahaan hoos u dhacii ugu badnaa wuxuu ahaa bilaha Aug iyo April ee sannadka 2025, wuxuuna hoos u dhacay 90% deeqdii la helay isla bilahaas ee sannadka 2024.



Jaantuska 5aad: Deeqaha Dibadda Jan-Oct 2025 & 2024

DHABTA KHARASHAADKA JAN-OCT IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

Faah-Faahin	Dhabta Kharashka Oct 2025	Dhabta Kharashka Jan-Oct 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	**64,417,627**	**652,039,609**	**1,359,714,328**	**1,359,714,328**	**48%**
Kharashaadka Joogtada	**48,484,325**	**448,837,921**	**631,431,735**	**628,053,674**	**71%**
Mushaarka Shaqaalaha	35,888,595	300,195,622	369,518,077	365,755,765	81%
Isticmaalka Agabka & Adeega	9,377,527	91,756,589	138,811,297	139,587,608	66%
Dulsaarka	-	5,344,428	9,141,862	13,800,000	58%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	-	-	0%
Deeqaha	2,968,203	40,401,533	89,572,715	91,641,266	45%
Faa'idada Bulshada	-	-	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	250,000	11,139,749	24,387,783	17,269,034	46%
Kharashaadka Mashaariicda	**15,933,301**	**203,201,688**	**728,282,593**	**731,660,654**	**28%**
Mushaarka Shaqaalaha	632,245	3,351,006	6,187,340	4,244,860	54%
Isticmaalka Agabka & Adeega	8,050,066	80,535,402	262,613,443	256,865,498	31%
Kaalmo Dhaqaale	1,166,469	8,407,926	13,177,722	13,280,000	64%
Deeqaha	3,708,258	53,724,609	137,824,825	147,022,709	39%
Faa'idada Bulshada	-	-	76,824,000	77,000,000	0%
Kharashaadka Kale	-	30,863,663	63,444,328	68,416,928	49%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	2,376,264	26,319,082	168,210,934	164,830,659	16%

Shaxda 5aad: Dhabta & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda Jan-Oct 2025,

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo dakhliga gudaha iyo kabka miisaaniyadadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiinta hawlaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maaligaliyaa kabka mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

KHARASHKA BISHA OCTOBER 2025

Sida ka muuqato shaxda 5aad waxaa la bixiyey bisha October 2025 kharash dhan **$64M.** kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **$48M** oo u dhiganta **75%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **$16M** oo u dhiganta **25%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha October 2025.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha October waxaana la bixiyey **$36M** oo u dhiganta **74%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$9M** oo u dhiganta **19%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha October 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa lagu bixiyey **$3M** oo **6%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha October 2025.

Kharashaadka mashaariicda ayaa la bixiyey bisha October 2025 kharash dhan **$16M** oo u dhiganta **25%** wadarta kharashaadka guud. Mushaarka shaqaalaha, kharashaadka la bixiyey bisha October waxaana la bixiyey **$632K** oo u dhiganta **4%** wadarta kharashaadka mashaaricda ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa lagu bixiyey **$8M** oo u dhiganta **51%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha October 2025.

Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **$3.7M** oo u dhiganta **23%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha October 2025.

KHARASHAADKA GUUD JAN-OCT 2025

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025 ayaa ahayd **$652M** oo u dhiganta **48%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **$448M** oo u dhiganta **71%** miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, halka mashaariicda laga bixiyey **$203M** oo u dhiganta **28%** miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2025.

KHARASHAADKA JOGTADA AH

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey **$300M** oo u dhiganta **81%** miisaaniyad sannadeedka Mushaarka shaqaalaha ee kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **67%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$92M** oo u dhiganta **66%** miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah. Wuxuuna **21%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iibsashadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey **$11M** oo u dhiganta **46%** misaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **2%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025.



Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah, Bilaha Jan- Oct - 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 6aad oo soo bandhigaya isbarbardhig kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Oct ee sannadaha 2025 & 2024.

Bilaha Feb-Aug 2025 wuxuu mujinayaa jaantuska 6aad koror kharash bixinta ah ee la bixiyey sannadka 2025 marka la barbardhigo kharashaadka joogtada ee la bixiyey isla bilaha ee sannadka 2024. Kharashka ugu badan waxaa la bixiyey bisha Feb, wuxuuna kabadan 40% wadarta kharashaadka joogtada ah ee labixiyey bisha Feb 2024. Sidoo kale bisha Mar ayaa la diiwangaliyey koror dhan 28% marka la barabardhigo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Mar 2024.

Bisha Febraayo ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey **$55M** oo ka badan **40%** kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Febraayo 2024. Sidoo kale bisha Maarso 2025 waxaa la bixiyey **$58M** oo ka badan **28%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Maarso 2024. Isbarabrdhiga bilaha kale ayaa ka hooseeya kororkood 13% marka la barbardhigo kharashaadka joogtada ee la bixiyey isla bilaha ee sannadka 2024.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa October ayaa ahayd **$203M** oo u dhiganta **28%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$80M** oo u dhiganta **31%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **40%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025. Kharashaadka Kaalmo Dhaqale ayaa la bixiyey **$8M** oo u dhiganta **64%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **4%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa October 2025.



Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaaciicda ah, Bilaha Jan-Oct - 2025 &

Sida ka muuqato jaantuska 7aad, oo isbarbardhig ku samaynayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October ee sannadaha 2025 & 2024. Bilaha Jan-Mar, May iyo Aug-Oct ee sannadka 2025, waxaa ka muuqda koror dhanka kharash bixinta mashaariicda, halka bilaha Apr, Jun iyo July ay ka muuqdaan hoos u dhac marka la barbardhigo bixinta kharashaadka mashaariicda ee isla bilaha ee sannadka 2024.

Bisha Mar ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey $42M oo ka badan 254% kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Mar 2024. Sidoo kale bisha Sep ee sannadka 2025 ayaa labixiyey $30M oo ka badan 57% kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Sep ee sannadka 2024.

Bisha Apr ee sannadka 2025 ayaa la bixiyey $4M oo ka hoosaysa 90% khaarashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bisha Apr ee sannadka 2024. Sidoo kale bisha Jun ee sannadka 2025 ayaa bixiyey 48M oo ka hooseeya 38% wadarta kharashaadka mashriicda ee la bixiye bisha Jun 2024.

ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BISHA OCTOBER EE 2025 & 2024

Faahfaahin	Dhabta Kharashka October 2025	Dhabta Kharashka October 2024	Koror/Naaqus
Wadarta Kharashaadka Guud	**64,417,627**	**60,687,285**	**6%**
Kharashaadka Joogtada	**48,484,325**	**47,543,141**	**2%**
Mushaarka Shaqaalaha	35,888,595	32,576,582	10%
Isticmaalka Agabka & Adeega	9,377,527	11,342,473	-17%
Dulsaarka	-	-	0%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	0%
Deeqaha	2,968,203	3,285,086	-10%
Faa'idada Bulshada	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	250,000	338,999	-26%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris			
Kharashaadka Mashaariicda	**15,933,301**	**13,144,144**	**21%**
Mushaarka Shaqaalaha	632,245	170,564	271%
Isticmaalka Agabka & Adeega	8,050,066	4,711,980	71%
Kaalmo Dhaqaale	1,166,469	265,600	339%
Deeqaha	3,708,258	4,586,245	-19%
Faa'iidada Bulshada	-	1,000,000	-100%
Other Expenses	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	2,376,264	2,409,756	-1%

Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha October 2025 iyo 2024

Sida ka muuqato shaxda 6aad oo isbarbardhigaysa kharashaadkii la bixiyey bisha October ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa kordhay **6%** bisha October 2025 marka la barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha October ee sannadka 2024.

Wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha October 2025 ayaa korortay **2%** marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha October ee sannadka 2024. Kharashaadka mashariicda ayaa la bixiyey **$16M** waxayna **21%** ka saraysaa wadarta kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bisha October 2024.

Kharashaadka joogtada ee Mushaarka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha October 2025 ayaa ahayd **$36M** oo **10%** oo ka saraysa kharashaadka joogtada ee mushaarka shaqalaha ee la bixiyey bisha October 2024. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha October 2025 ayaa ahaa **$9M** wuxuuna **17%** ka ka yar yahay kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha October 2024.

Dhammaan kharashaadka mashaariicda ayaa korortay marka laga reebo kharashaadka Deeqaha iyo Faa'iidada Bulshada ee la bixiyey bisha October 2025, marka labarbardhigo kharashaadkii la bixiyey bisha October 2024. Kharashadka Kaalmo Dhaqaale aya kordhay **339%,** sidoo kale deeqaha la siiyo dawlad goboleeyada ayaa hoos u dhacay **19%,** marka la barbardhigo kharashaadka deeqaha ee la bixiyey bisha October 2024.

ISBARBARDHIGA KHARASH BIXINTA BILAHA JAN-OCT EE 2025 & 2024

Faahfaahin	Dhabta Kharashka Jan-October 2025	Dhabta Kharashka Jan-October 2024	Koror/Naaqus
Wadarta Kharashaadka Guud	**652,039,609**	**631,274,423**	**3%**
Kharashaadka Joogtada	**448,837,921**	**408,700,079**	**10%**
Mushaarka Shaqaalaha	300,195,622	277,640,144	8%
Isticmaalka Agabka & Adeega	91,756,589	84,567,630	9%
Dulsaarka	5,344,428	2,898,503	84%
Kabka	-	-	0%
Deeqaha	40,401,533	42,397,321	-5%
Faa'idada Bulshada	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	11,139,749	1,196,480	831%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	0%
Kharashaadka Mashaariicda	**203,201,688**	**222,574,344**	**-9%**
Mushaarka Shaqaalaha	3,351,006	2,554,979	31%
Isticmaalka Agabka & Adeega	80,535,402	55,911,371	44%
Kabka	8,407,926	5,475,134	54%
Deeqaha	53,724,609	52,270,267	3%
Faa'idada Bulshada	-	92,706,551	-100%
Other expenses	30,863,663	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	26,319,082	13,656,042	93%

Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- Oct 2025 & 2024

Iskudarka kharashaadka Guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025 ayaa wax yar ka badan kharshaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo October 2024. Kharashaadka joogtada ah ayaa kordhay **10%,** halka kharashaadka mashaariicda ay hoos u dhaceen **9%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2024.

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey **$300M** bilaha Janaayo ilaa October 2025 wuxuuna kordhay **8%** marka la barbardhigo Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2024. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$92M** wuxuuna ka badan yahay **9%** kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2024. Sidoo kale soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa aad u kororтay bilaha Janaayo ilaa October 2025.

Kharashaadka Maashaariicda waxaa la bixiyey **$203M** bilaha Jan-Oct 2025, wuxuuna ka hooseeyaa **9%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan-Oct 2024. Waxaa kororka ugu badan sameeyey kharashadka soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn oo gaaray koror dhan **93%** marka la barbardhigo kharashaadkkii soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2024. Sido kale waxaa kaloo kordhay **54%** kharashaadka kabka ee laga bixiyey kharashaadka mashaariicda ee bilaha Jan-Oct 2025, marka la barbardhigo kharashaadka kabka ee la bixiyey bilaha Jan ilaa October 2024.

DHABTA KHARASHAADKA BILAHA JAN-OCT, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8aad waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud ee Dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025, iyadoo loo kala saarayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Janaayo ilaa October 2025, waxaa la bixiyey kharash dhan **$652M** oo u dhigma **48%** wadarta miisaaniyad sanadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

Faah-faahinta	Dhabta Kharashka October 2025	Dhabta Kharashka Jan-Oct 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	**64,417,627**	**652,039,609**	**1,359,714,328**	**1,359,714,328**	**48%**
Kharashaadka Joogtada	**48,484,325**	**448,837,921**	**631,431,735**	**628,053,674**	**71%**
Hay'adaha Adeeg Maamulka	17,091,877	174,127,628	274,057,579	273,973,094	64%
Hay'adaha Adeeg Amniga	23,037,639	209,840,025	260,321,007	257,147,965	81%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	3,962,121	29,749,192	45,215,916	45,127,551	66%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	4,392,689	35,121,076	51,837,232	51,805,063	68%
Kharashaadka Mashaariicda	**15,933,301**	**203,201,688**	**728,282,593**	**731,660,654**	**28%**
Hay'adaha Adeeg Maamulka	7,344,850	75,706,184	164,554,355	164,634,351	46%
Hay'adaha Adeeg Amniga	-	-	-	-	0%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	6,166,401	72,564,634	286,207,948	289,506,013	25%
Hay'daha Adeeg Bulshada	2,422,050	54,930,870	277,520,289	277,520,289	20%

Shaxda 8aad: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan ee la bixiyey waxaa laga bixiyey miisaaniydda kharshaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **$448M** oo u dhiganta **71%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025. Kharashaadka joogtada ee la bixiye ayaa ka ahaa **69%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October r 2025.

Iskudarka bilaha Janaayo ilaa October ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **$209M** oo u dhiganta **81%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa laga bixiyey **$174M** oo u dhiganta **64%** miisaaniyad sannadeedka kharshaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **$30M** oo u dhiganta **66%,** Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **$35M** oo u dhiganta **68%** miisaaniyad sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiye bilaha Janaayo ilaa October 2025 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Amniga, waxaana ku baxday, **$209M** oo **47%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025. Hay'adaha maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday **$174M** oo **39%** wadarta kharashaadka joogtada ah, Ha'aydada Bulshada ayaa lagu bixiyey **$35M** oo **8%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah, halka Hay'adaha dhaqaalaha lagu bixiyey **$30M** oo **7%** ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey **$203M** oo u dhiganta **28%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **31%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa October 2025.

Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **$75M** oo u dhiganta **46%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada hay'adaha dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **$72.5M** oo u dhiganta **25%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey **$55M** oo u dhiganta **20%** miisaaniyadda mashaariicda ee haya'daha bulsha.

DHAMMAAD

Lifaaqa 1aad: Faahfaahinta Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah Jan-Oct

Madaxa	Faahfaahin	Iskudarka Dhabta Kharshaadka Jan-Oct 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Dambe
010100	**Xafiiska Madaxtooyada**	**9,446,199**	**12,563,126**	**12,529,086**	**75%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**5,155,115**	**6,547,992**	**6,662,112**	**79%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	797,361	956,763	1,012,068	83%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	4,314,824	5,533,989	5,592,804	78%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	42,930	57,240	57,240	75%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**4,291,084**	**6,015,134**	**5,834,203**	**71%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	970,811	1,525,000	1,425,000	64%
2221	Hawlaha Guud	242,613	323,492	323,492	75%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	553,446	737,959	737,959	75%
2224	Agabka iyo Alaabaha	14,022	18,700	18,700	75%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	36,000	36,000	36,000	100%
2231	Kirooyin	45,000	80,000	60,000	56%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	1,692,840	2,274,360	2,251,200	74%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	736,352	1,019,623	981,852	72%
26	**Deeqaha**	-	-	**32,771**	0%
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	-	32,771	0%
010201	**Xafiiska Golaha Shacabka**	**22,304,437**	**28,014,021**	**27,893,681**	**80%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	18,542,910	22,419,330	**22,363,440**	83%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	1,809,940	2,151,420	2,095,620	84%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	16,732,970	20,267,910	20,267,820	83%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**3,338,848**	**4,558,926**	**4,494,476**	**73%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	561,541	764,450	720,000	73%
2221	Hawlaha Guud	218,846	295,250	295,250	74%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	368,640	491,520	491,520	75%
2224	Agabka iyo Alaabaha	186,394	255,200	235,200	73%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	188,637	251,526	251,526	75%
2231	Kirooyin	121,800	243,600	243,600	50%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	1,692,990	2,257,380	2,257,380	75%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**422,679**	**1,035,765**	**1,035,765**	**41%**
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	422,679	1,035,765	1,035,765	41%
010202	**Xafiiska Aqalka Sare**	**5,867,687**	**8,018,246**	**7,973,196**	**73%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	3,908,125	4,723,296	**4,723,296**	83%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	132,450	161,280	161,280	82%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	3,775,675	4,562,016	4,562,016	83%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**1,725,450**	**2,275,950**	**2,245,900**	**76%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	175,450	211,850	196,800	83%
2221	Hawlaha Guud	108,950	147,600	147,600	74%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	200,250	267,000	267,000	75%
2224	Agabka iyo Alaabaha	224,400	289,200	259,200	78%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	12,000	21,000	36,000	57%
2231	Kirooyin	145,800	194,400	194,400	75%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	858,600	1,144,900	1,144,900	75%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**234,112**	**1,019,000**	**1,004,000**	**23%**
3111	Dhismooyinka iyo Qaab dhismeedka	49,238	834,100	900,000	6%

Madaxa	Faahfaahin	Iskudarka Dhabta Kharshaadka Jan-Oct 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Dambe
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	184,874	184,900	104,000	100%
010300	**Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**	9,353,238	12,731,047	**10,610,236**	73%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	2,963,257	3,773,217	**3,689,352**	79%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	788,984	947,754	928,584	83%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	2,158,238	2,805,063	2,740,368	77%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	16,035	20,400	20,400	79%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	6,247,748	8,457,830	**6,420,884**	74%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	980,708	1,742,549	1,020,000	56%
2221	Hawlaha Guud	317,885	399,400	399,400	80%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	464,805	619,748	619,748	75%
2224	Agabka iyo Alaabaha	150,078	200,244	200,244	75%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	(0)	40,000	40,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	3,187,110	3,985,320	2,848,200	80%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	1,147,163	1,470,570	1,293,292	78%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	142,233	500,000	**500,000**	28%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	142,233	500,000	500,000	28%
010400	**Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga**	3,011,591	4,257,443	**4,028,603**	71%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	2,210,906	2,758,980	**2,551,020**	80%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	1,491,730	1,829,925	1,696,680	82%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	719,176	929,055	854,340	77%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	800,685	1,498,463	**1,477,583**	53%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	279,221	480,000	480,000	58%
2221	Hawlaha Guud	98,960	132,083	132,083	75%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	96,000	96,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	24,355	97,500	97,500	25%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	1,332	16,160	16,160	8%
2231	Kirooyin	-	81,000	81,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	371,540	501,720	480,840	74%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	25,277	94,000	94,000	27%
010401	**Safaaradaha**	4,166,707	5,350,784	**5,381,729**	78%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	3,672,295	4,481,175	**4,518,300**	82%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	1,347,465	1,666,350	1,714,860	81%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	2,324,830	2,814,825	2,803,440	83%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	494,412	869,609	**863,429**	57%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	31,500	264,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	44,005	166,925	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	39,327	159,327	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	21,500	54,327	89,327	40%
2231	Kirooyin	-	34,475	86,925	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	472,912	665,975	96,925	71%
010500	**Wasaaradda Maaliyadda**	14,029,036	17,917,962	**16,661,302**	78%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	9,409,922	11,644,958	**11,332,932**	81%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	3,425,351	4,120,053	4,043,580	83%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	5,800,341	7,277,345	6,994,992	80%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	184,230	247,560	294,360	74%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	4,477,579	5,773,004	**4,828,370**	78%

Madaxa	Faahfaahin	Iskudarka Dhabta Kharshaadka Jan-Oct 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Dambe
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	606,515	880,000	480,000	69%
2221	Hawlaha Guud	590,829	821,320	821,320	72%
2222	Communications	60,666	60,667	-	100%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	201,809	256,000	216,000	79%
2224	Agabka iyo Alaabaha	646,701	940,507	940,507	69%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	289,410	365,599	365,599	79%
2231	Kirooyin	358,640	386,000	384,000	93%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	669,667	741,967	300,000	90%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	1,053,341	1,320,944	1,320,944	80%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	141,535	500,000	**500,000**	28%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	141,535	500,000	500,000	28%
010501	**Xafiiska Xisaabiyaha Guud**	2,846,473	3,595,797	**3,413,164**	79%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	2,334,014	2,896,160	**2,754,360**	81%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	667,368	824,697	789,060	81%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	1,341,176	1,639,043	1,532,880	82%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	325,470	432,420	432,420	75%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	512,459	699,637	**658,804**	73%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	28,984	36,874	36,874	79%
2221	Hawlaha Guud	129,559	174,950	174,950	74%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	15,485	22,050	36,050	70%
2224	Agabka iyo Alaabaha	241,711	337,013	275,930	72%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	7,870	8,750	15,000	90%
2231	Kirooyin	35,142	48,000	48,000	73%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	53,708	72,000	72,000	75%
010502	**Adeega Guud ee Dowladda**	54,510,227	114,814,954	**125,322,973**	47%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	8,384,639	13,817,746	**18,944,021**	61%
2243	Adeegyadda Bangiga	8,384,639	13,678,207	13,678,207	61%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	7,864	265,814	0%
2291	Kharashka kutalagalka Lama Filaan	-	131,676	5,000,000	0%
24	**Dulsaarka**	5,344,428	9,141,862	**13,800,000**	58%
2411	Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	5,344,428	9,141,862	13,800,000	58%
26	**Deeqaha**	39,901,533	89,072,715	**90,108,495**	45%
2621	**Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah**	4,221,581	7,116,500	**8,594,000**	59%
2631	**Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda**	35,679,952	81,956,215	**81,514,495**	44%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	879,627	2,782,630	**2,470,457**	32%
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	14,400	298,198	300,000	5%
3112	Qalabka iyo Mashiinadda	385,438	684,432	370,457	56%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	479,789	1,500,000	1,400,000	32%
3114	Nidaamyada Hubka	-	100,000	200,000	0%
3144	Hantida aan Qiimo Dhicin ee an la Taaban Karin	-	200,000	200,000	0%
010503	**Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya**	783,714	997,837	**1,004,452**	79%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	609,765	741,837	**748,452**	82%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	196,095	236,637	243,252	83%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	413,670	505,200	505,200	82%

Madaxa	Faahfaahin	Iskudarka Dhabta Kharshaadka Jan-Oct 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Dambe
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	173,949	256,000	**256,000**	68%
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	17,235	28,523	120,000	60%
2221	Hawlaha Guud	44,492	60,000	60,000	74%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	8,750	15,000	15,000	58%
2224	Agabka iyo Alaabaha	103,472	115,477	24,000	90%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	1,000	1,000	0%
2231	Kirooyin	-	36,000	36,000	0%
010600	**Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha**	1,919,580	2,796,158	**2,757,998**	69%
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	1,563,520	1,977,231	**1,939,836**	79%
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	784,980	982,866	939,336	80%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	673,150	853,845	859,980	79%
